



# Ku soo dhawow inaad fikrad ka dhiibato dugsiga xanaanada iyo waxbarashada!

## Waxaanu u baahanahay aragtidiina si aanu u noqono kuwa fiican

Ma jirto wax intay aad u fiicantahay aanay suurtagal ahayn in la sii fiicnaysiiyo. Waxaanu doonaynaa inaanu caawimaada aragtidiina ama cabashadiina aanu sii fiicnaysiino shaqadayada.

Degmada Linköping waxay doonaysaa inay kuu fududeyso inaad dhiibato aragtidaada, iyo sidaas si la mid ah la fiicnaysiiyo fursadaada inaad raad ku yeelato hawlaha degmada.

Degmada Linköping waxay leedahay qaab fiican oo ay ku wajahdo aragtiyada iyo cabashooyinka oo waxaanu u aragnaa caawimaad in la sii fiicnaysiiyo oo la sii horumariyo shaqadayada.

## Sidan ayaad u soo gudbin kartaa aragtidaada iyo cabashadaada:

- Ku dhiibo aragtidaada iyadoo hadal ama qoraal ahaan ah oo toos ugu gudbi shaqadan
- Warqad u dir:  
Utbildningsförvaltningen  
Apotekaregatan 13C,  
581 81 Linköping
- E-mail u dir: utbildningsforvaltningen@linkoping.se

Aragtidaada/cabashadaada waa la diiwaan gelinayaa oo sidaas waxay ku noqonayaan dokumenti dadweynahu heli karo

## Jawaab/xiriir gudaha 7 maalmood

Madaxa mas'uulka ah/maamulaha dugsiga ayaa gacanta ku haynaya aragtidaada iyo cabashadaada.

Haddii aad dhiibto magacaaga, lambarka telafoonka iyo/ama e-mailka waxaa lagula soo xiriirayaa gudaha 7 maalmood.